# Shirka wadatashiga Saxiixayaasha Soomaalida ee Barnaamijka Dhamaystirka Geedisocodka Xilliga Kala Guurka ah

## War-Murtiyeed

## Galkacyo, 26 March 2012

Shirkii Wadatashiga saxiixayaasha Soomaaliyeed ee barnaamijka dhamaystirka Xilliga kalaguurka ah ayaa maanta oo bishu tahay 26 Maarso 2012 lagu qabtay magaalada Galkacyo. Shirka waxaa martigaliyey Dawladda Puntland, waxaana fududeeyey Xafiiska ergayga gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya.

Shirka waxaa ka soo qaybgalay saxiixayaashii geedi-socodka barnaamijka dhamaystirka xilliga kalaguurka ah, oo ay ka mid yihiin Mudane Shiikh Shariif Shiikh Axmed, Madaxwaynaha Dawladda Federaalka KMG ah ee Somaaliya, Mudane Shariif Xasan Sheikh Adan, Guddoomiyaha Baarlamaanka FKMG, Mudane Cabdiweli Maxamed Cali, Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda DFKG, Mudane Cabdiraxman Shiikh Maxamed Maxamud (Farole), Madaxwaynaha Puntland, Mudane Cabdisamad Cali shire, Madaxwayne ku-xigeenka Puntland, Mudane Cabdisamad Nuur Guuleed, Madaxwayne ku-xigeenka ahna Ku-simaha Madaxwaynaha Galmudug, Sheekh Maxamed Maxmuud Yuusuf (Libaax) oo matalaya Ahlusuna Waljamaaca(ASWJ) iyo Danjire Augustine Mahiga, Ergayga gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Arimaha Soomaaliya.

Iyadoo laga ambaqaadayo xaaladda Siyaasadeed ee Soomaaliya iyo baahida loo qabo in si deg-deg ah loo dhaqangaliyo Barnaamijka Dhamaystirka ee xilliga kala guurka ah( Road Map- ka) iyo mabaadii'da lagu heshiiyey Garowe I & II, waxaa hogaamiyayaashii shirka ka soo qaybgalay ka doodeen qaabka loo fulin lahaa heshiisyadaas, waxaana ay isku raaceen qodobadda hoos ku xusan:

1. In la dardargaliyo dhamaystirka barnaamijka xilliga kala guurka ah iyo heshiisyadii Geedi-socodka iyo Mabaa-diida Garowe I & II

2. In la dedejiyo xulashada xubnaha ka mid noqonaya Golaha Ansixinta Dastuurka oo sharuudahoodu ku cadyihiin go'aamada Garowe I & II, waxaana la isla gartay in tirada loo soo xulayo xubnaha shirwaynaha la yareeyo,si ay u sahlanaato waxqaybsiga 4.5 ee lagu heshiiyey.

3. Tirada Golaha Ansixinta Dastuurka oo lagu go'aamiyey Garowe II oo ahayd 1000 qof, waxaa la isla gartay in laga dhigo 825, taas oo lagu qaybinayo habka 4.5, oo loo arkay waxqaybsi raadraac hore leh.

4. Waxaa la isku raacay in Madax Dhaqameedyada Somaaliyeed ay noqdaan dadka soo xulaya xubnaha Golaha Ansixinta Dastuurka , ayagoo kaashanaya qaybaha kala duwan ee bulshada sida Culumaa'udiinka, Aqoonyahaanada, Dhalinyarada, Haweenka, Ganacsatada iyo qaybaha kale ee bulshada.

5. Waxaa la isla gartay 135 xubnood oo ka imanaya Madax Dhaqameedka afar beelood oo min 30 xubnood ah iyo Beesha Shanaad oo 15 xubnood ah iyagoo la tashanaya beelahooda, waxay soo xuli doonaan Xubnaha Golaha Ansixinta Dastuurka iyo Xubnaha Baarlamanka Cusub iyagoo ay gacan siinayaan Guddi Farsamo oo ka kooban 17 xubnood oo 6 xubnood ka imanayaan Hay'adaha Dawladda Federaalka Soomaaliyeed, 3 xubnood Puntland, 3 xubnood Galmudug, 3 xubnood ASWJ, 2 xubnood Xafiiska Siyaasada Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNPOS), iyo 6 xubnood oo ka socda beesha caalamka oo goobjoogayaal ah. Wixii caqabad noqda waxaa loola soo noqonayaa Saxiixayaasha Road-Mapka iyo mabaadi'da Garowe I & II.

6. Waxaa Lagu heshiiyey in shirka ugu horeeya oo Madax dhaqameedyadda soo xulaya Ergada Ansixinta Dastuurka ay kulankooda ugu horeeya ku yeeshaan magaalada Muqdisho, 25 April, 2012.

7. Waxaa la isku raacay in masuuliyadda iyo dhamaystirka barnaamijka Xilliga kala - guurka ah iyo Mabaadii'da Garowe I iyo II ay si gaar ah u saaran tahay saxiixayaasha barnaamijka ( Road Map-ka) oo ah cidda loola noqonayo wixii caqabad ah

8. Waxaa la isku raacay fududeynta iyo taageerada maaliyadeed ee barnaamijka dhamaystirka xilliga ku meelgaarka ah in si degdeg ah looga sugayo beesha caalamka.

9. Wixii aan halkan ku cadeyn waxaa loola noqonayaa Road Map-ka iyo Mabaadi'da Garowe I & II.

**Saxiixayaasha Shirka Wada Tashiga Soomaalida ee Xilliga Kala Guurka ah**

Mudane Sheekh Sharif Sheekh Axmed
Madaxweynaha Dowladda Federaalka KMG ah ______________________
26.03.2012, Galkacyo, Puntland

Mudane Sharif Xasan Sheekh Aaden
Guddoomiyaha Baarlamaanka FKMG ah ______________________
26.03.2012, Galkacyo, Puntland

Mudane Cabdiweli Maxamed Cali
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda FKMG ah ______________________
26.03.2012, Galkacyo, Puntland

Mudane Cabdirahman Sheekh Maxamed Maxmud (Faroole)
Madaxweynaha Dowladda Puntland ee Soomaaliya ______________________
26.03.2012, Galkacyo, Puntland

Mudane Cabdisamad Nuur Guuleed ______________________
Madaxwayne ku Xigeenka ahna Ku simaha Madaxwaynaha Galmudug
26.03.2012, Galkacyo, Puntland

Mudane Sheekh Maxamed Maxmuud Yuusuf (Libaax)
Matalaya Ahlusuna Waljamaaca(ASWJ) ______________________
26.03.2012 Galkacyo, Puntland

Danjire Augustine Mahiga
Ergayga gaarka ah ee XG ee QM ee Soomaaliya ______________________
26.03.2012, Galkacyo, Puntland